

Xaashida Lagu Shaqeyo ee Qiimeynta Farsamada Gacanta

Vocational Assessment Worksheet

1. Waa maxay nooca shaqada iyo goobta shaqada ee aad rajeynayso in aad hesho?
2. Ma jeclaan lahayd in aad dad kale ku martiqaado in ay ka soo qaybgalaan kullanaada DVR iyo/ama in ay kaa caawiyaan foomkan (t.a., saaxiib xubin qoyska ka tirsan, u-doode, mas'uul sharci, macallin ama la-taliye VR kale oo ka socda barnaamij kale)?
3. Haddii aad qaadato dheefaha Damaannada Bulshada, miyaad daneynaysaa in aad wax badan ka oggaato iyo sida ay u saameyn karaan marka aad shaqo tagto?
4. Marka aad shato tagto, immisa lacag ah ayaan ugu baahan doontaa miisaaniyadaada bilaha si aad ugu taakuleyso ama ugu kaafiso baahiyadaada iyo kuwa qoyskaaga?
5. Sharrax macluumaadka suuqa shaqada ee tilmaamaya in yoolkan shaqo uu yahay mid loogu baahan yahay degaankaaga: Haddii aanan loogu baahnayn , maxaad tixgelisay oo kordhin kara fursadahaaga shaqo ee majaalkan (t.a., waayo-aragnimada shaqo ee la beegsadey, shaqo ku tababarasho, tababar lagu qaado shaqada gudaheeda, u wareegidda meel cusub)?
6. Shaqooyinkeed ka tixgelisay ama ka fiirsatey shaqooyinka aadka loogu baahan yahay (t.a., sida sayniska kombiyuutarka, dayreelka caafimaadka, sayniska, tiknoolajiyadda, injineernimo iyo xisaab)?
7. Waa maxay shuruudaha shaqada gaarka ku ah ee ku jira yoolkaaga shaqo (t.a., qaadashada shahaado gaar ah, shuruudaha shati-qaadashada, baaritaanka daroogada, waayo-aragnimo gaar ah, iwm.)
8. Yoolkaaga shaqo miyuu u baahan yahay baaritaannada raadraaca sida shuruud ku xiran shaqaaleynta? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, DVR waxay u baahan tahay in aad sameyso baaritaannada raadraaca ee xaqiijinaya in aanan lagaa reebin shaqada gaarka ah.
9. Fadlan sharrax qiimeynta taageeraysa yoolkaaga shaqo (t.a., tijaabooyinka shaqada, iskaa-wax-u-qabsi ama waayo-aragnimada shaqada ku saleysan iskuulka, fasal lagu horumarinayo xirfadaha shaqo, iwm.)?
10. Sharrax taariikhda waxbarashadaada / tababarkaaga, oo ay ku jiraan shatiyada iyo shahaadooyinka:
11. Miyaad leedahay qiyam dhaqameed gaar ah, hab-dhaqanno iyo/ama baahiyada luuqadda la doorbidayo ee aad jeclaan lahayd in aad la wadaagto DVR ka hor shaqo raadinta iyo geynta?
12. Sharrax guulaha iyo caqadaha aad horey ugala kulantey helidda iyo sii joogidda shaqo (t.a., taariikh shaqo, daldaloollada shaqada, xirfadalaha la wareejin karo, waayo-aragnimada iskaa-wax-u-qabso, iwm.)?
13. Sharrax waxyaabaha aad ku xoogan tahay ee gaarka ah ee ka dhigaya yoolkan shaqo mid habboon:
14. Sharrax kheyraadyadaada shakhsiyeed ee taageeri kara qorshahaaga shaqo (t.a., qoyska iyo taageerada bulshada, gaadiidka, iwm.):
15. Sharrax caqabadaha la xiriira naafonimadaada ee kaa hor-istaagan shaqada (t.a., walaacyada dhaqdhaqaaqa, dhibaatooyinka istaagnaanta muddooyin waqti ah oo dhaadheer, caqabado war-isgaarsiin, dad la dhaqanka, xusuusta, in ay kugu adag tahay barashada macluumaad cusub / hawlo):

16. Sharrax sida aad iminka u maareynayso caqabadahaaga la xiriira naafonimada (t.a., la-talinta, daaweyn jireed, tababar xirfadeed, kooxda taageero):	
17. Sharrax caqabado kasta oo dheeraad ah oo kaa hor-istaagaya shaqada oo ahayn kuwo la xiriira naafonimo (t.a., daryeelka carruurta, la'aanta cinwaan boosto sax ah / email / telefoon, taariikh dambiyeed, gaadiidka, guryeynta, gargaar cunto, iwm.):	
18. Waa maxay adeegyada aad u maleynayso in aad u baahan karto si aad u gaarto yoolkaaga shaqo?	
NOOCYADA ADEEGYADA	SHARRAX
Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa (AT) (t.a., qiimeynta goobta shaqada, kombiyuutar gaar ah / software, tababar ku saabsan sida loo isticmaalo aaladaha AT, iwm.)	
Nolosha madax-banaan (IL) (t.a. tababarka miisaaniyad-dejinta, barashada sida loo maareeyo jadwalka, maareynta qoyska/baahiyada nolol maalmeedka, maareynta waqtiga, iwm.)	
Adeegyada Caawimaadda Shakhsiga (PAS) (PAS waa adeegyada uu bixiyo xirfadlaha daryeelka caafimaadka si uu ugu caawiyo hawlaha nolol maalmeedkooda shakhsiyaadka jirka naafada ka ah, xanuunka dhimirka qaba, iyo baahiyada kale ee daryeelka caafimaadka.)	
Shaqaaleynta La Taageero (SE) (SE waxaa laga yaabaa in loogu talagalay shakhsiyaadka ugu baahan caawimaad qoto-dheer helidda iyo haysashada shaqo iyo/ama taageerada goobta shaqada si ay u sii shaqeeyeen oo sabab u ah dabciga iyo darnaanta naafonimada.)	
Adeegyada Ku-meelgaarka ah (TS) (TS waa adeegyada iyo taageerada loogu talagalay ardeyda ama dhallinyarada naafada ah, oo ay da'doodu u dhaxeeyso 14-24, oo ay ku jiraan imaanshaha kulanada IEP / qorshaha 504.)	
Adeegyo Kale (t.a. hagidda/la-talinta xagga farsamada, wareysiga / dharka shaqada, qalabka, kaalmada gaadiidka, shatiga / shahaado-siinta, qorsheynta dheefaha damaannada bulshada, iwm.)	
19. Marka aad u diyaar-garowdo in aad shaqo raadsato, miyaad caawimaad ugu baahan doontaa kuwan soo socda midkood? <input type="checkbox"/> Caawimaadda codsiga <input type="checkbox"/> U-diyaar-garowga wareysiga <input type="checkbox"/> Kulamada mid midka ah si looga shaqeeyo taariikhda shaqada iyo waxbarashada <input type="checkbox"/> Waraaqda sharxaysa waxa ku qoran warqadaha codsiga <input type="checkbox"/> Shaqo raadin <input type="checkbox"/> Shaqada laga raadiyo barta internet-ka <input type="checkbox"/> Email u dir meelaha shaqada laga heli karo <input type="checkbox"/> Codsiga heer-sare ah <input type="checkbox"/> U gudbinta WorkSource (t.a., Taxanayaasha Job Hunter, xirfadaha kombiyuutarka ee aasaasiga ah, tababarka Microsoft, adeegyada dambiihaha hore, adeegyada shaqaalaha bislaadey, adeegyada dhallinyarada) <input type="checkbox"/> Kale:	
20. Sharrax macluumaad kasta oo dheeri ah ee taageera yoolkaaga shaqada:	
21. Yoolkaaga shaqaaleynta gaarka ah waa in uu waafaqsanaadaa waxyaabaha aad ku xoogan tahay, kheyraadyada, mudnaanaha, walaacyada, awoodaha, karaanka, xiisaha, iyo dookha xog-ogaalka loo yahay. Yoolkaaga shaqaaleynta gaarka ah waa:	